Somali



# Qashinka bey'adda lagu tuurayo waa dhibaato wayn

Qashinku qayb kama aha bey'adda. Qashinku bey'adda ayuu wasakheeyaa, wuxuu dhaawacaa xayawaanka wuxuuna halis ku keenaa caafimaadka dadka. Tusaale ahaan qashinka caaga ah, waa qashinka ugu badan ee bey'adda lagu tuuro, wuxuu ku dambeyn karaa biyooleyda sida wabiyada iyo badaha. Halkaas marka uu gaadho wuxuu dhaawaci karaa dhirta iyo xayawaanka wuxuuna marka ugu dambeysa soo galayaa raashinka aan cunno.

In qashinka la nadiifiyo waxaa Helsinki kaga baxda malyuuno yuuro sannadkii. Lacagtaas waxaa loo isticmaali lahaa waxyaabo kale.

Bey'adda nadiifta ah waxaay ku dhiirigalinaysaa qofka inaanan qashin lagu tuurin dhulka, haddiise bey'ddu ay wasakh tahay taasi dad badan ayaay ku keentaa inay dhulka sii wasakheeyaan. Waxyaabaha yar ee uu qof kasta sameeyo waxaay leedahay saameynta aad filayso mid ka wayn! Si wadajir ah ah aan u ilaashano nadaafadda bey'addeena.

# Adigu maxaad ka qaban kartaa arrintan - Shan talo

1. Qashin ha tuurin, qashinka waxaa lagu tuuraa qashinqubka, laguma tuuro waddada ama bey'adda.

2. Ka fogow wax iibsiga aan loo baahnayn. Dharka iyo agabka hore loo soo isticmaalay waxaay dhaqaaleynayaan lacagta iyo bey'adba. Haddii aad wax cusub iibsanayso, iibso agab si waareysa loo sameeyay.

3. Wareeji qashinka! Qashinka kala sooc markaad joogto guriga, shaqada iyo goobaha dadwaynahaba. Haddii aanad garanaynin wax kasta meesha loogu talogalay, ka hubi **buuga tilmaamaha ah ee qashinka ee HSY** (ku qoran af finnish, af iswidhish iyo af ingiriis).

4. Ka fogow iibka caagga aan loo baahnayn. Tusaale ahaan, isticmaal dhaladaada cabitaanka oo qaado bac adigu leedahay markaad wax iibsanayso.

5. Ka qaybqaado ololaha qashin ururiska. Haddii aad hal qashin maalintii gurto, halkaas qashin wuxuu ka yaraanayaa bey'adda. Qalabka qashinka lagu gurto waxaad ka ammaahan kartaa laybareeriga.

- **Wax naga wayddii ama aragti-celin naga sii qashinka bey'adda arrimaha la xidhiidha**.
- **Faahfaahin dheeraad ah ku akhriso (ku qoran af finnish, af iswidhish iyo af ingiriis)**.

**Doorashooyinka nololmaalmeedka waara**